



## Fariin muhiim oo ka socota Guddoomiyaha Waxbarshada kuna saabsan miisaaniyada

Waan idin salaameynaa Qoysaska Dugsiyada Dadweynaha Portland,

Bisha Abril 4teedii waxaan u soo bandhigay Golaha Waxbarashada soo-jeedintii miisaaniyada sanad-dugsiyeedka 2017-2018 ee iskuuladeena. Waxaan rabaa inaan idiin xaqiijiyo inaad ogaataan waxa uu yahay mudnaanteena sida aan u kharash gareyno iyo macnaha ay kuu yeelaneyso adiga iyo ardeyda Dugsiyada Dadweynaha Portland ama ardeyda.

Miisaaniyadani waa mid kala doorashadeedu tahay mid aad u adag. Waxaan sameynay shaqaale dhims dheeraad ah xarunta maamulka ee dhexe sidii aan mudnaan u siin lahayn addeegyadii tooska ahaa ee ardeyda, laakiin waa in aan wali iskuuladeena qaar ku sameynaa. Inkastoo si kala duwan dhimistaasi ay u saameyn doonto iskuulada, waxay noqon doontaa mid la dareemi doono. Soo jeedinta miisaaniyadani waa tallaabadii ugu horeysay geedi socod dheer, iyadoo aan raadin doono fikirkiina iyo ka qeybqaadashada inta aan ku gudo jirno maareynta xaaladani adag ee miisaaniyadeed.

Ugu horeyn aan sawir yar idinka siiyo Dakhliga gobolka, isaga oo kordhaya haddana maaha mid ku filan inuu taageero buuxda siiyo iskuuladeena k-12. Inkastoo Xeer dejinta Oregon wali aanay ansixin miisaaniyadii gobolka ee kama dambeysta ahayd ilaa inta laga gaarayo bisha Luulyo, haddana waan soo bandhigeynaa miisaaniyad dheelitiran iyadoo la isticmaalayo macluumaadka ugu fiican ee aan hayno. Marka aad eegto tallo soo jeedinta guddoomiyaha gobolka iyo xeer dejiyaasha gobolka ee maanta, waa in aan mala'awaalnaa in maalgalintu ay ka hooseysan doono heerka addeega aan hadda bixino, waana ta keentay in aan qorsheynta inaan jarno maalgalin guud oo dhan 18 malyuun doolar. Waxaan sii wadi doonaa in codkeygu gaaro xeer dejiyaasha iyo Guddoomiyaha Gobolka Salem, iyadoo aan idinkana idinku dhiirigalinayo inaad sidaas oo kale sameysaan.

Sidii aan u yareyn lahayn in uu raad ku yeesho waxbarashada fasalka ka socota iyo natiijada ardeyga, waxaan soo jeedinayaa inaan ku sameeyo dhimitaan la taaban karo xarunta dhexe ee maamulka PPS iyo in aanan buuxin jagooyin fara badan oo aan iminka cid ku magacaabneyn sidii aan u kaydin lahaa iskuuladeena kharash suurtagal ah. Miisaaniyadani mudnaanteedu soo jeedinta waa:

- Sinaanta – waxaan ka sii shaqeyneynaa sidii aan u yareyn lahayn faraqa guusha jinsiga ee u dhaxeeya ardeydeena.  
Barashada ardeyda iyo guusha.
- Caafimaadka iyo nabadgelyada ardeyda – ilaalinta in ay ardeydeenu noqdaan kuwa jidh ahaan iyo xis ahaan nabadqaba.

Xitaa dhimistani, waxaad arki doontaa in mudnaantu ay ka turjumto meelaha aan dib ugu qoondayno ilaha dhaqaale sidii aan u sii wadi lahayn horumarka iyadoo ah meelaha furaha u ah guusha ardeyda. Gaar ahaan, miisaaniyadeydu waa mid dib u maalgalineysa:

- \$1.3 malyuun si toosa iskuulada
- \$3.4 malyuun lagu buuxiyo deeqadii dawlada dhexe bixin jirtay iyo deeqihii gobolka ee waxbarashada dhismaha jidka(PE), hagayaashii, iyo barnaamijyo kale
- \$2.2 malyuun oo lagu taageero manhajka akhriska iyo qorista iyo la-taliyaasha degmada guud ahaan
- \$4.3 malyuun oo lagu taageerayo nabadgelyada iyo caafimaadka dhismayaasha iskuuladeena

Waxaan jecelnahay inaan war kaa helno ku saabsan sida aan u qoondaynay(qaybinay) lacag ahaan Dugsiyada Dadweynaha Portland. Fadlan waxaad tixgelisaa inaad ka soo qeybgasho mid ka mid ah kulanada soo socda dhegeysiga shirka Golaha Waxbarashada:

Abriil 11 – 6 p.m., Dugsiga Sare ee Madison, 2735 NE 82<sup>nd</sup> Ave., Portland, OR 97220.

Abriil 25 – 5 p.m., Xarunta Dhexe ee Addeega Waxbarashada Blanchard, 501 N. Dixon St., Portland, OR 97227

Maayo 9 – 5 p.m., Xarunta Dhexe ee Addeega Waxbarashada Blanchard

Golaha Waxbarashadu wuxuu qaban doonaa kulan shaqo oo miisaaniyada ah bisha Maayo 23keeda, iyadoo la filayo in kii lagu dhaqmi lahaana la filayo bisha Juun.

Waxaan u baahanahay gargaarkiina iyo in aad aragtidiina ku soo dartaan sidaa awgeed waxa ay soo sameyn doonaa miisaaniyad sawir ka bixisa qiimaha Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo mudnaanta iyadoo xitaa lagu gudo jiro waqti ilahii dhaqaaluhu la yareeyey. Waxaan aaminsanahay wada jirkeena in aan soo saari karno miisaaniyad horumarisa waxyaabaha inoogu mudan degmo ahaan iyado oo aan xaqiijineyno in ardeydeenu ka baxaan Dugsiyada Dadweynaha Portland iyaga oo diyaar u ah jaamacada, xirfadaha iyo noloshaba.

Waad mahadsan tihiin.

Bob McKean, Guddoomiyaha Waxbarashada ee Ku-meel-gaarka ah